

— 826 —

Qodobka 200aad

Qaabka Gaarsiinta Xukumada

Xukumada la doonayo in uu u billowdo waqtiga racfaanku waxaa lagu gaarsiinayaa wakiilka Dacwadda ama dhinaca sida lagu soo caddeeyey qodobka 124.

MADAXA SHANAAD

SAXIDDA XUKUNNADA IYO AMARADA

Qodobka 201aad

Mararka Saxidda

Waa u bannaan tahay had iyo jeer Garsooraha soo saaray Xukunka ama amarka haddii sidaas ay warsadaan dhinacyada midkood ama naftiisaba inuu saxo gafafka maadiga ah ama kuwa ku saabsan xisaabta ee uu ku dhacay markii uu qorayey Xukunnada.

Qodobka 202aad

Tillaabada Saxidda

Garsooruhu wuxuu ku gaarayaa amar saxidda lagu sheegay qodobka hore haddii uu jiro heshiis dhinacyada ee ku saabsan saxidda, haddii kale wuxuu soo saarayaa amar kaddib markuu dhegeysto dhinacyada. Waxaana waajib ku ah Garsooraha inuu ku tilmaamo go'aanka uu gaaray geesta xukunka asalka ah ee uu saxay.

MADAXA LIXAAD

QAADIDDA DACWADDA DHINACYADEEDU MAQAN YIHIIN

Qodobka 203aad

Maqnaanshaha Dacwoodaha

Haddii Dacwooduhu imaan waayo Maxkamadda, waa uu bannaan tahay Garsooraha inuu amro in Dacwadda laga tirtiro buugga Dacwoodaha, una caddeeyo in dacwaddii ay dhacday.

Haddiise uu yimaado dacweysanaha uuna weydiisto in in dacwaddii la wado dacwoodaha oo maqan; Garsooraha wuxuu go'aan ku gaarayaa maqnaanshaha dacwoodaha wuxuuna amrayaa wadidda Dacwoodaha.

Qodobka 204aad

Maqnaashaha dacweysanaha

Haddii uu maqnaado dacweysanaha, Maxkamadduna soo jeediso ceeb ku lug leh gaarsiinta wadidda, Maxkamadda waxay u qabaraysaa dacwadaha waqti go'an ee uu ku cusbooneysiyo wacidda, cusboonaynta waciddu waxay baajinaysaa dhicidda dacwadda. Haddii uu dacweysanaha iman waayo fadhiga cusub, Garsoorahu marka laga reebo qaybta lagu sheegay qaybta ugu dambaysta ee Qodobka 117, wuxuu caddaynayaa maqnaanshihiisa, wuxuuna amrayaa wadidda dacwadda.

Haddii dacwooduhu fulinwaayo amarka cusboonaynta gaarsiinta wacidda, Garsooruhu wuxuu amrayaa in dacwadda laga tirtiro Buugga Dacwadaha, dacwadduna sidaas ayey ku dhacaysaa.

Qodobka 205aad

Gaarsiinta iyo ogeysiinta waraaqaha dhinaca maqan

Go'aannada amraaya baarista, weydiinta cusub, ka hor-tagga ama dacwooyin cusub waxaa la gaarsiinayaa dhinaca maqan naftiisa qof ahaan.

Waraaqooyinka kale oo dhan waxaa loo qaadanayaa in ogeysiintooda ku dhammaato marka la dhigo Xafiiska Kaaliyaha.

Xukunnada waxaa la gaarsiinayaa dhinaca naftiisa.

Qodobka 206aad

Wacidda dhinaca maqan

Waa u bannaan tahay dhinaca la caddeeyey maqnaanshihiisa inuu yimaado goor kasta, asagoo dhigaayo jawaab celinta dacwadda xafiiska Kaaliyaha, ama yimaado fadhiga dacwadda, ilaa inta dacwadda aan loo dirin xukun.

Waa u bannaan tahay inuu weydiisto Garsooraha, markuu yimaado kaddib, in la siiyo waqti uu ku diyaariyo difaaca horey uga reebnaa.

Garsooraha markuu miisaamo sababaha keenay maqnaanshaha iyo inay habbon tahay in la oggolaado weydiinta kor lagu soo sheegay, go'aan ayuu ka gaarayaa wuxuuna soo saarayaa amar.